

Ardayda qaarkeed ma doonayaan inay dugsiga aadaan sababtoo ah:

U-xoogsheegashada

Dhibaatooyinka xirriir ee ay kala kulmaan saaxiibadooda, asaagooda ama barayaashooda

Shaqada oo aad ugu adag

Kadeedka

Doonidda inay qoyskooda la joogaan



Barayaasha jooga dugsiga waxay:

- Qaadaan imaanshaha ama xaadirinta maalin kasta
- Ku weydiiyaan warqad haddii aad maqnaayd
- Hubiyaan inaad caafimaad qabto haddii aad dugsiga wax badan ka maqnaato
- Waalidka ama daryeelaha la socodsiiyaan markii aad maqnaato

MA FIICNA INAAD ISKA MAQNAATO

Wixii macluumaad dheeraad ah dugsiyadu waxay kala xirriiri karaan xafiiskooda gobolka ee DE&T



www.sofweb.vic.edu.au/wellbeing/welfare/attend.htm




Department of
Education & Training

MA FIICNA INAAD ISKA MAQNAATO

Macluumaadka
Imaanshaha Ardayda
Dugsiyada Sare

Maxaad uga baahan tahay inaad dugsiga Tiimaadho?



Knowledge & Skills
Building a Future

Somali



The Place To Be

Masuuliyadda ardayda

- ✓ Imow dugsiga maalin kasta
- ✓ Dhowr waqtiyada fasallada la galo, kulannada dugsiga iyo barnaamijyada dugsiga ka-baxsan
- ✓ La socodsii dugsiga sida ugu dhakhsaha badan markii aad ogaato inaad maqnaanayso
- ✓ Keen shahaadooyinka caafimaad, warqadaha ballamaha ama wixii caddaymo kale ah oo sheegaya sababaha maqnaanshahaaga isla markii aad ku soo noqoto dugsiga
- ✓ Xafiiska ku saxiix foomka imaanshaha markii aad soo daahdo
- ✓ Xafiiska ku saxiix foomka bixitaanka, warqadda caddayntana dhiib markii aad hore uga baxayso dugsiga



Kumaan kala hadli karaa haddii ay jirto dhibaataada imaanshaha?

- Baraha fasalka (classroom teacher), baraha Waddada Shakhsiga ee La Maamulo (M.I.P.s), isu-duwaha heer sannadeedka ama isu-duwaha daryeelka ardayda
- Waxaa laguuri diri karaa aqoonyahanka cilmi-nafsiga (psychologist) ama adeegaha bulshada (social worker)
- Haddii imaanshaha dhibaato noqdo sabab jirta awgeed, kala hadal qofka aad is-leedahay waad ku kalsoon tahay

10 nasteexo ku saabsan si aad ula socoto

✓ Si taxadar leh u-qaado imaanshaha dugsiga

Markii aad dugsiga si joogto ah u timaaddo, fasalkana waqtigii la doonayey aad gasho waxaad awoodi doontaa inaad wax fiican qabato, dugsigana aad ku faraxsanaato.

✓ Dugsiga si joogto ah u imow

Mar aad fasalka ku jirtey marna ma dareentay yaab ama deganaan la'aan sababtoo ah maadan garan karin waxa fasalka ka socda? Taas oo laga yaabo inay sababtoo ahayd inaad ka maqnayd wax muhiim ah maalintii hore haddana aad dareemayso inaad la socon casharka? Isla markii dhaqankaas bilaabmo, way adag tahay in la joojiyo.

✓ U-sheeg dugsiga iyo barayaasha heeganka ah haddii aad maqnaanayso

Haddii aad maqnaanayso u-sheeg dugsiga iyo barayaasha inay la socdaan. Markii ay barayaashu ogaadaan xaaladdaada way kaala shaqayn karaan sidii qorshe laguugu samayn lahaa waxayna aad ula soconayaan xaaladdaada markii aad dugsiga ku soo noqoto.

✓ Kala qabso wixii ku dhaafay barayaasha fasalkaaga

Haddii aad gaftey casharrada qaarkood waxaad hubisaa inaad aragto barayaashaada si aad u ogaato sidaad ula qabsan lahayd. Barayaashu way garanayaan xaaladdaada waxayna samayn karaan siyaabo fudud oo kuu sahlan. Mararka qaarkood barayaashu waa mashquul waxaana laga yaabaa inaysan ku caawin Karin, ee bal adigu iska weydii.



✓ La soco barnaamijyadaada dugsiga ka-baxsan- VET, VCAL, tababarka shaqo, shaqo-barashada, tababaridda

Yaysan ku khaldin inaad is-dhigato sababtoo ah barnaamijyada dugsiga oo u e'g kuwo cusub ama baddalan. Kuwaani waa qayb ka mid ah barnaamijkaaga caadiga ah waxayna leeyihiin shuruudihii imaanshaha sida casharada dugsiga.

✓ Xariif noqo

Baro inaad adeegsato xusuus-qor si aad ugu qoroto maalmaha muhiimka ah sida maalmaha qiimaynta iyo kuwa dalxiisyada gaaban. Waqtiyada adeegga, ballamaha dhakhtarka iyo kan ilkaha haku aadin maalmaha dugsiga.

✓ Baro xirfadaha bulshadeed iyo shabakadaha saaxiibada

Dugsigu waa meel fiican oo saaxiibo laga samaysto. Ayadoo qayb ka ah nidaamkan waxaad samaysan doontaa xirfadaha muhiimka ee bulshadeed iyo shaqo-kooxeed.

✓ Noqo mid shaqo u diyaar ah

Ogow in dugsigu kugu caawinayo inaad shaqo diyaar u noqoto. Dhaqannada si joogto ah u imaanshaha dugsiga waxay kuu diyaariyaan dhaqanka imaanshaha shaqada waqtiga ku habboon.

✓ Hel waxbarashada iyo tababar dheeraad ah

Ogow in dugsigu kugu caawinayo inaad waxbarasho iyo tababar dheeraad ah u diyaar noqoto. Dhaqannada shaqada dugsigu waxay kuu diyaariyaan waxbarasho iyo tababar dheeraad ah.

✓ Sharci gaar ah

Ogsoonow haddii aad sheegto sababaha maqnaanshahaaga waxaa fududaan doonta in tixgelin la siiyo dhibaataada lagaa aqbalay.

